# NIDAAMKA OGGOLAANSHAHA GOOSHIDA

*Adeegyada Baadhida Boston*

*Hagahan waxa uu bixiyaa muuqaal kooban oo waxa uu faahfaahiyaa dhismaha guud ee oggolaanaya nidaamka baadhida gudaha Magaalada Boston. Su'aalaha gaarka ah, fadlan la xidhiidh Adeegyada Baadhida 617-635-5300 ama isd@boston.gov, soo wac 311.*

City of Boston
Inspectional Services

# TUSMADDA


## 1. GETTING STARTED

Step 1: Learn the Process and Context

Step 2: Check the Property's Occupancy & Zoning

Step 3: Determine Your Permit Requirements

## 2. MOVING FORWARD

Step 4: Gather the Correct Information

Step 5: Submit Your Permit Application

## 3. FOLLOWING UP

Step 6: Understand the Review Timeline

Step 7: Appeal Your Application

Step 8: Determine Next Steps

Step 9: Consult Other Resources

# 1. BILAABIDA

### TALLAABADA 1: BARO NIDAAMKA & MACNAHA GUUD

- **Kumaa ka masuul ah oggolaanshaha dhisida?** ***Adeegyada Baadhitaankas*** waxay maamulaa oo dhaqan geliyaan dhismayaasha, guruyaha, caafimaadka, sixada, iyo sharciyada badbaadada ay u xil saareen Dowladda iyo gobolku. Oggolaanshaha mashruucyada dhismaha waxaa ku jira dhismaha, korontada, dhuumo gelinta, iyo gaaska waa in loo adeegsado ka hor qabashada shaqada. Iyaddoo ku xidhan baaxada, qiyaasta, iyo goobta mashruucaaga, dib u eegida ka timid wakaaladaha kale waa loo baahan karaa.
- **Miyaad dhisaysaa ama dib ma u cusboonaysiinaysaa ganacsiga yar?** ***Xafiiska Fursada Dhaqaalaha iyo Ku darida Gollahu*** waxa uu bixiyaa ilaha halka joogsi ah ee dhammaan ganacsiyada gudaha Magaalada Boston, ay ku jiraan Kooxda Horumarka Ganacsiga Yar iyo Jidadka Muhiimka ah ee Boston, labbadaba oo bixiya ilaha si loo bilaabo, loo kobciyo, oo loo dhiso ganacsiyada gudaha Boston.
- **Miyaad dhisaysaa ama dib u cusboonaysiinaysaa gurigaaga?** ***Xafiiska Duqa Magaalada ee Guriyaynta*** iyo ***Deegaanka*** Waaxaha, siiba ***Wakaalada Qorshaynta & Horumarinta***, waxay bixisaa ilaha mulkiilayaasha guryaha iyo kiraystayaasha si loo ogaado wax badan oo ku saabsan xaaladaha meeleed iyo deegaaneed ee dhismaga gudaha Boston.

### TALLAABADA 2: HUBI AAG SAMAYNTA DHISMAHA & HEERKA KU JIRADA GURIGA

- **Waxaan qorshaynayaa inaan dhiso Boston. Halkeen ka bilaabaa?** Ka hor inta aanad codsan oggolaanshahaaga si aad u bilowdo nooc kasta oo dhismaha ah, oo aanad hore u samayn, waxaad la tashan doontaa xirfad yaqaanka nashqada ee ruqsada haysta (Guri dhisaha ama Injineerka) ee gobolka Massachusetts iyo qandaraaslaha ruqsada haysta ee caawin kara qaabaynta dhokumentiyada habboon oo kugu hagaan dhexda nidaamka oo dhan. Waxaad dooni kartaa inaad xaqiijiso taariikhda oggolaanshaha goobta, magacaabida aag u samaynta, iyo heerka ku jirida sharciga ah.

## BAAHIYAHA NASHQADA & DHISMAHA

- **Qandaraaslaha Ruqsada haysta —** Marka laga fekerayo cida aad u baahan tahay inaad shaqaalayso mashruucaaga, waxaanu ku talinaynaa keliyaa inaad isticmaasho qandaraasle ruqsad haysta (CSL) oo haysta HIC (Qandaraasida Horumarinta Guriga), oo in qofkan loo magacaabay uu u adeegsado dhammaan oggolaanshaha isagoo ku meteliyada adiga.
    - Waxaad ka eegi kartaa Ruqsadaha Dhisaha Ruqsada haysata ***bogga gobolka***.
    - Macluumaadka dheeraadka ah ee helida qandaraaskaha, samaynta heshiiska, iyo waxa la ogaanayo ka hor iyo muddada dhismaha, booqo ***Horumarka Guriga & Tilmaamaha Qandaraasida*** bogga.
- **Nashqadaynta Meesha —** Nidaamka oggolaanshaha ee foomamka dheer waxay u baahan doonaa inaad soo gudbiso qorshayaasha dhismaha ISD si dib loogu eego oo loo ansixiyo. Waxaanu ku talinaynaa inaad raadiso oo samayso qorshe shaqaalaynta qof wax dhisa ama nashqadeeye soo saari kara sawir farsameed isagoo ku metelaya. Xaalado badan halka aanay jirin isbeddelada isticmaalka jira, ka bixida, ama xadadka kale ee dhabta ah, qorshayaasha looma baahan karo. Dib u samaynta fudud ee guriga, badanku uma baahna qorshayaashan.

## DIB U EEGIDA CADDAYNTA SHARCIGA AH

- **Taariikhda Oggolaanshaha —** Ka hor inta aan l abilaabin, hubi isticmaalka sharciga iyo ku jira dhismaha ee jirta iyo oggolaanshahii hore ee onlaynka ah dhexda ***Raadinta Oggolaanshaha Dhismaha.*** Dhokumentiga ISD Qolka 1010 Massachusetts Ave. waxa uu bixin karaa kaalmo dheeraad ah.
- **Magacaabida Aaga —** Waxaad ka hubin kartaa aaga la isticmaalayo onlay addoo ka raadinaya qaybta magacaabida ee ***Boston Planning & Development Agency khariidadeeda la raadin karo.*** Iyaddoo ku xidhan nooca shaqada aad niyada ku hayso inaad samayso, mashruucaagu waxa uu ku dhici doonaa qaybaha labbada aaga ah:
    - **Xaq u lahaanshaha —** Haddii dhismahaaga aag loogu sameeyay isticmaalka aad ula jeedo oo way waafaqdo dhammaan aagaga kale ee shuruudaha, waxaad sii wadi kartaa nidaamka codsiga.
    - **Aag Beddelka —** Haddii shaqada la soo jeediyay ma waafaqdo dhammaan shuruudaha aag u samaynta hadda, markaa, codsigaaga oggolaanshaha waa la diidi doonaa, oo waxaad u baahan doontaa inaad

raadiso kala duwanaanshaha ka yimid [Zoning Board of Appeal](#) (ZBA) oo waxay noqon doontaa dib u eegida nidaamka xaafada.
    - **Cusboonaysiinta Heerarka** - Waxaad awoodi doontaa inaad raad raacdo kordhinta dadka degeenka ah **Raad raacaha ZBA.**
- **Caddaynta Ku jirida Sharciga ah —** Goobta Adeegyada Baadhidu waxay kuu sheegtaa ***sida loo helo caddaynta lama huraanka ahf*** haddii diiwankaagu hadda ka hor uu jiro ama aanu jirin. Xaqiiji inuu jiro diiwaan sharci ah ee isticmaalka iyoku jirida hantida ka horaysa adeegsiga oggolaanshahaaga.
    - **Diiwaanka Faylka ku jira —** Waxaad codsan kartaa koobiga diiwaanka ku jirada ee ka yimid ISD ka hor inta aanad raadsan foomka dheer ama gaaban ee oggolaanshaha, iyaddoo ku xidhan nooca dhismaha (nidaamkan waxaa lagu muujiyay hoos).
    - **Diiwaan kuma jiro faylka —** Waxaad u baahan doontaa inaad codato si aad u xaqiijiyo ku jirida guriga.  Iyadoo ku xidhan baaxada shaqadaada miduun waxaad ku dari kartaa faahfaahinta shaqada ee codsigan ama waxaad sugi kartaa codsiga si uu u soo baxo oo ka dibna waxaad codsan kartaa oo heshaa oggolaanshe yar ee shaqada la soo jeediyay.

## TALLAABADA 3: GO'AAN KA GAADH SHURUUDAHA OGGOLAANSHAHAAGA

### OGGOLAANSHAHA DHISMAHA GAARKA AH

- **Sababtee ayaan ugu baahanahay oggolaanshaha dhismaha?** Oggolaanshaha waxaa looga baahan yahay in la bilaabo nooc kasta oo dhismaha ah si waafaqsan sharciga. Sida la sheegay, nidaamka oggolaanshaha Adeegyada Baadhida waxay ku salaysan tahay haddii aad isbeddelo ku samaynayso qaabka dhismaha ama ku sii jirida dhismaha.
- **Kumaa u baahan inuu codsado oggolaanshaha dhismaha?** Qof qandaraasle ah, shirkada ama mulkiile guri oo raadinaya inuu sameeyo mashruuc dhisme waxa uu u baahan yahay inuu adeegsado oggolaanshaha dhismaha.
- **Oggolaanshahee dhismaha ayaan u baahanahay?** Haddii aad hadda ka hor go'aansatay ku jirada iyo aaga xaaladaha dhismahaaga, waxaa dhici karta inaad hadda ka horba ka fekertay oggolaanshaha qaabka gaaban ama qaabka dheer in loo baahan yahay.
    - **Qaabka gaaban/Oggolaanshaha yar —** Kuwan waxaa loogu baahan yahay shaqada yar iyo shaqooyinka aan beddelin dhismaha: a) Isticmaalka ama ka bixida, b) Ilaalinta Dabka, c) Ama aaga nolosha.

- **Qaabka Dheer/Beddelka Oggolaanshaha —** Kuwan waxaa loogu baahan yahay dhismaha cusub, ama si loo sameeyo cusboonaysiinta muhiimka ah dhisme jira ee u baahan kordhinta dadka dega. Tusaalooyinka guud waxaa ku jira:
    - *Dhismaha cusub iyo qaybo ku darista,*
    - *Dib u samaynta qaab dhismeedka ama dib u cusboonaysiinta,*
    - *Isbeddealda ama sharciyaynta isticmaalka ku jirada guriga, haddii aanu jirin diiwaan,*
    - *Samaynta* ***Qaybta Degida ee Dheeraadka ah (ADU)****,*
    - *Ku rakibida nidaamka celinta dabka ama digniinaha dabka.*
    - *Awooda isticmaalka ee kordhaysa gudaha dhismaha.*
- Macluumaadka dheeraadka ah ee oggolaanshaha dhismaha ee ka duwan, booqo ISD ***Noocee Oggolaanshaha Dhismaha ah ayaan U baahanahay?*** bogga.

## OGGOLAANSHAHA KALE EE LA IXDHIIDHA

- **Ma u baahan doonaa oggalaanshe kale muddada dhismaha?** Haa, way dhici kartaa in mashruucaagu u baahan doonto codsiyada oggolaanshe kale. Labbadaba mashruucyada degista iyo ganacsiga, ISD waxaa ku jira "sida loo" waxa uu hagaa noocyada oggolaanshaha soo socda.
    - ***Oggolaanshaha Duminta Guriga***
    - ***Isticmaalka oggolaanshaha dhismayaasha***
    - ***Aasaaska oggolaanshaha***
    - ***Oggolaanshaha dhismaha cusub***
    - ***Kaydka guban kara ruqsada geerashka*** *- Loo baahan yahay haddi mashruucu uu ku jiro geerashka gudaha guriga lagu daray*
    - ***Jiigadaha birta ah*** *(shaqada beebabka)*
    - ***Oggolaanshah Korontada iyo Makaanikada***

- **Dib u eegida Waaxda(ha) —** Iyada oo ku xidhan baaxada mashruucaaga, nidaamka oggolaanshaha waxaa ka mid ahaan kara baahiyaha ka yimid Deegaanka, Calaamadaha Dhulka, Biyaha & Dhuunta biyaha qashinka, ***Guddida Horumarinta Dad waynaha***, iyo Waaxaha Dabka.

# 2. HORE U SOCODKA

### TALLAABADA 4: SOO URURI MACLUUMAADKA SAXDA AH

- **Waxa loo baahan yahay codsashada oggolaanshaha dhismaha?** Labbadaba oggolaanshaha qaabka gaabajn iyo qaabka dheer, codsadayaashu waa inay u diyaar ahaandaan inay bixiyaan macluumaadka soo socda ama dhokumentiyada:
  - *Faahfaahinta Buuxda ee Shaqada*
  - *Wadarta Kharashka oo dhan lagu qiyaasay*
  - *Aqoonsiga iyo Ruqsadaha Ganacsiga*
  - *Koobiga Heshiiska Qandaraaska*
  - *Ka dhaafida Mulkiilaha Guriga*
  - *Qoraalak Dhaarka ah ee Mattocks Higgins*
  - *Qoraalka Dhaarta ah ee Magdhwga Shaqaalaha*
  - *Macluumaadka kale ee Suuragalka ah*
    - *Tirada xakamaynta jiirka ee salka iyo seeska shaqada.*
    - *Dhokumentiga dhismaha, ay ku jiraan qorshayaasha (haddi uu yahay qaab dheeraad ah)*
    - *Shahaadada caafimaadka ee diyaarinta cuntadda ganacsiga*
    - *Qoraalka dhaarka ah ee Badbaadada Dhismaha (oo ku xidhan cabirka mashruuca iyo nooc aoggolaanshaha)*
  - *Oggolaanshaha Guddida Calaamada dhulka (haddii laga shaqaynayo degmo taariikhi ah)*
- **ISD Liiskeeda Guud ahaaneed** - This ***Liiska Codsiga Oggolaanshaha Dhismaha*** waxay dabooshaa mid kastoo ka mid ah qaybahan o ah qoto dheer oo ku xidhan heerka burburinta dhismaha iyo dhismaha cusub.
- **Raadi Oggolaanshaha La ansixiyay** - The ***Analyze Boston*** bogga sidoo kale waxaa ku jira qaabka raadinta oggolaanshahii hore iyo kuwii dhawaan ee la bixiyaya, dhammaan kuwaas oo ah diiwaanka dad waynaha, oo daboolaya dhaqamada ugu wanaagsan ee buuxinta macluumaadkan.

### TALLAABADA 5: SOO GUDBI CODSIGAAGA OGGOLAANSHAHA

## HALKA LAGA CODSANAYO

- **Xageen ka codsadaa oggolaanshaha dhismaha?** Badanka noocyada oggolaanshaha dhismaha waxaa lagu dhammaystiri karaa onlayn dhexda[Oggolaanshaha ISD & Degelka Oggolaanshaha.]() U diyaar garow inaad samayso oo xusuusato macluumaadkaaga gelida oo aad ku kaydin karto shaqada socota marka la soo ururinayo macluumaadka lama huraanka ah.

## SIDA LOO CODSADO

- **Sideen u codsanayaa oggolaanshaha dhismaha?** Waxaanu ku dhiirigelinaynaa dhammaan dadka raadinaya oggolaanshaha inay marka koowaad ka codsadaan dhexda degelka. Haddii aad gasho arrinta u baahan kaalmada qof ahaaneed, xafiiska SD xaga 1010 Massachusetts Avenue waxay kaa caawin kartaa Isniinta-Jimceha, laga bilaabo 8 Subaxnimo ilaa 4 Galabnimo.
- **Nidaamka Guud ahaaneed —** Nidaamka codsiga waxa uu u baahan doonaa inuu dhammaystiro tallaabooyinka soo socda:
    - *Isku diiwaan geli kooto (magaca isticmaalaha & erayga sirta ah)*
    - *Dooro nooca oggolaanshahaaga, goobta, iyo doorka (saddex tallaabo)*
    - *Ku dar macluumaad xidhiidhka kooxda*
    - *Dooro nooca shaqada, nooca inta ay qaadanayso, qiimaha shaqada la qabanayo , faahfaahinta shaqada*
    - *Soo geli dhokumentiyada*
    - *Bixi khidmaha la xidhiidha*
- **Buuga Hagaha —** Dad badan oo noola yimid anaga iyagoo wata su'aalo gaar ah oo ku saabsan sid aloo codsado oggolaanshaha ama loo soo geliyo dhokumentigooda. Jawaab ahaan, waxaanu samaynay ilaha muuqaalka oo dhowr ah si loogu dhex hago nidaamka.
    - ***Bogga shabakada: Sida loo helo oggolaanshaha Qaabka Gaaban***
    - ***Bogga shabakada: Sida loo helo oggolaanshaha Qaabka Dheer***
    - ***Fiidyaha: Sida loo codsado Oggolaansha Qaabka Gaaban***
- **Lacag bixinta —** Kharashka oggolaanshe kasta ee laga heli karo**halkan.** Waxaad kubixin kartaa kaadhka dhebidka, kaadhka kitidhitka ama onaylka PayPal.

# 3 LA SOCODKA

## TALLAABADA 6: FAHAN JADWALKA WAKHTIGA DIB U EEGIDA

- **Maxay ku qaadataa oggolaanshaha in la ansixiyo?** Haddii dhammaan dhokumentiyada lagu xisaabtamo oo si sax ah loo soo geliyo, oggolaanshahaaga dib ayaa loo eegi doonaa dhowr marxaladood:
  - *Qaadashada & lacag bixinta*
  - *Dib u eegida mashruuca*
  - *Dib u eegida qoondaynta aaga (haddii ay lama huraan tahay)*
  - *soo saarid*
  - *Baaadhida*
  - *Inta ay leekaanayso*
  - *Dhammaystirka*
  - *Dib u eegida dhismaha*
  - *Koodhka Dib u eegida Ka hortagga Dabka*

- **Ilaa imisa ayay qaadan doontaa oggolaanshahayaga in dib loo eego?**
  - **Qaabka Gaaban —** Waxa uu qaadan karaa 1 todobaad dhammaan dhokumentiyada saxda ah.
  - **Foomka Dheer —** Waxay ku xidhnaan kartaa cabirka mashruuca, inta u dhaxaysa 4 ilaa 5 todobaad dhammaan dhokumentiyada loo baahan yahay la gudbiyay iyo haddii codsigu aanu u baahnayn dhisme ama aaga kordhinta.

## TALLAABADA 7: RAFCAAN U QAADISTA CODSIGAAGA

- **Maxaan samaynayaa haddii oggolaanshahayga la diiday?** Haddii ISD ay soo saaro warqadda diidmaha cidsigaaga oggolaanshaha, waa ay dhici kartaa inaad dib u nashqadayn karto mashruucaaga ama aad raadiso noocyo/ka khafiidin ah guddida aaga qoondaynta. Halkan waxaa ah faahfaahinta tallaabo talaabada ah ee waxa la samaynayo:
  - **Gudbi Rafcaanka —** Ka dib marka aad hesho warqadda diidmada ah ee ISD, waa inaad ***ku soo gudbisaa rafcaankaagal*** 45 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda warqadda diidmada ah.

- **Dib u eegida Bulshadda —** Marka aad rafcaankaaga la gudbiyay ***Xafiiska Duqa magaalada ee Adeegyada Xaafada (ONS)*** si uu u bilaabo nidaamkaaga dib u eegida bulshadda. Tani waxay ka mid ahaan kartaa kullanka dadka leh guryaha ku dhegan ee Isku xidhaha Xaafada ONS ee metela xaafada taas oo mashruucaga lagu wado inuu ka dhaco, oo inta badan soo xaadirka kullanka dadka madiniga maxaliga ama ururka xaafada.
- **Guddida Rafcaanka Aag qoondaynta —** Ka dib marka nidaamkaaga bulshadda la dhammaystiro, ONS waxay ku wargelin doontaa ISD in rafcaankaagu dyaar u yahay in ballan loo qabto dhegaysi horta***Guddida Rafcaanka Aag qoondaynta*** (ZBA), oo kullanta labba todobaad oo kasta. Iyaddoo ay sababtay xaalada mugga iyo shuruudaha ogaysiiska sharciga ah, waxay qaadan kartaa ilaa dhowr todobaad ka hor rafcaankaaga inta aan la maqal. ***Raad raacaha ZBA*** iyo ***Nidaamka Rafcaanka ZBA*** haguhu sidoo kale waa ilo caawimo leh.
- **Legal Decision —** Ka dib maqalkaaga, go'aanka sharciga marka la qoro oo loo gudbiyo Guddoomiyaha si uu u saxeexo. Marka la saxeexo, waxaa jira muddo rafcaan 20 maalmood oo loo baahanyahay ee la dhammaynayo ka hor go'aanka rafcaanka inta aan la soo af jarin iyo qorshayaasha waxaa lagu celiyaa Baadhaha Qorshayaasha ISD wixii dib u eegida u dambaysa ah.
- Baadhaha Qorshayaashu waxay kugu wargelin doonaa qoraal ahaan haddii dhokumentiyo badan loo baahan yahay in lagu soo af jaro nidaamka dub u eegida.

## TALLAABADA 8: GO'AAMINTA TALLAABOOYINKA XIGA

- **Maxaan samayn doonaa ka dib oggolaanshahayga marka la soo saaro?** Hambalyo! Ka hor inta aan shaqada mashruuca la bilaabin, waxaad u baahan tahay inaad hesho kaadhka Oggolaanshaha Dhismaha oo daabacan. Haddii aad oggolaanshaha ka codsaday onlayn, tani waa shay aad iskaa u daabici karto.
- **Goorma ayaan isticmaali karaa gurigayga ama furi karaa ganacsigayaga?** Ilaalinta oggolaanshaha la xidhiidha waa tallaabo wayn gudaha nidaamka dhismaha, laakiin waxay u baahan doontaa inay la socoto baadhitaanada dhismaha la codsanayo wejiyada ka duwan ee dhismaha. ISD waxay qaban doontaa baadhitaano muddada uu socdo mashruucaagu. Warbixinta ka timid baadhitaanada waxaa loo baahan yahay inay xidhaan oggolaanshaha. Intaa

waxa dheer, Waaxda Dabka Boston, haddii aad leedahay garsoor, waxay u baahan tahay inay oggolaatoguusha weli hadhsan ee qalabyada badbaadada nolosha lagu rakibay iyo latijaabiyay. ***La xidhiidh Baadhaha*** si aad u bilowdo. Waxaa lagaaga baahan karaa inaad hesho shahaadada inta meeshu ay leekaanayso.

- **Intee ayuu gaadhayaa oggolaanshahaygu?** Marka aad hesho oggolaanshe, shaqada waa inay ku blaabantaa lix bilood gudaheed taariikhda soo saarida iyo sii wadista iyaddoon la joojin. Xaaladaha qaarkood, waxaad awoodi kartaa inaad kordhiso oggolaanshahaaga muddooyin dheeraad ah oo wata oggolaanshaha ISD.

## TALLAABADA 9: LA TASHO ILO DHEERAAD AH

- **Ilahee kale ayaa la heli karaa?** Iyaddo ku xidhan sifada mashruucaaga, ISD waxay ku talinaysaa la tashiga barnaamijyada kale iyo hagayaasha la xidhiidhi kara dhismahaaga iyo mashruuca.
  - **Barnaamijka Qyabta Dheeraadka ah ee Degista (ADU) Program —** Barnaamijka ADU waxa uu u oggolaadaa mulkiilayaasha ku jira gudaha Magaalada Boston inay qab ka jraan halka ay guryahoodu ku yaalaan ee jirta si loo sameeyo qaybo madax banaan, oo loo yaqaano Qayabaha Dheeraadka ah ee Degista (ADUs) oo aan lahayn dib u eegida aag qoondaynta. Macluumaadka dheeraadka ah ee barnaamijkan tijaabada ah, fadlan la tasho***websaydkooda.***
  - **Hagaha Furida Makhaayada —** La shaqaynta Xafiiska Horumarka Dhaqaalaha, ISD oo la isku daro ***Hagaha Furida Goobaha Adeega Cuntadda*** (oo lagu heli karo luqaddoo badan) oo bixiya muuqaalka guud oo faahfahiya oggolaanshaha gaarka ah ee makhaayada iyo nidaamka baadhida gudaha Magaalada Boston.
  - **Hagaha Aag Qoondaynta 101 -** Fiirso ***Qoon korodhsiga Aag samaynta 101*** oo ay marti gelisay ISD horaantii 2021 oo arag ***Hagaha Rafcaanka Guddida Aag qoondayntae*** wixii ah sharaxa sida mashruucu u dhex maro nidaamka aag qoondaynta oo uga jawaabo qaybo su'aalaha inta badan la is waydiiyo ah oo ku saabsan nidaamka aag qoondaynta.
  - Fiiro: Gudaha ***aaga loo qoondeeyay daadka***, ma jiraan qayb hoyga la dego ah oo loo oggolaan karo hoosta heerka daadka (BFE) ee lagu sheegay khariidada iyaddoo uu hadidi kale oggolaado Masuuliyiinta Haysata Garsoorka mooyaane (AHJ).